**Maalinta Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ee 8-da Maajo 2019**

**Farriinta Guddoomiyaha Ururka Bisha Cas**

Munaasabadda Maalinta Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas oo ku beegan 8-da Maajo ayaa Ururka Bisha Cas wuxuu u dabaal-dagaya maalintan oo muujinaya doorkiisa gaarka ah ee bulshada dhexdeeda iyadoo hal-ku-dhegeedu yahay “Mabaadi’da Ayaa Na Mideeya”.

Ururka Bisha Cas oo ay hoggaamineyso Mabaadi’da Asaasiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ayaa wuxuu gargaar bani’aadamnimo gaarsiiyey dadka nugul oo ku sugan dalka. Adeegyada la bixiyey ayaa waxaa ka mid ahaa daryeelka caafimaadka aasaasiga ah, dhaqan-celinta naafada, gargaarka degdegga ah, dib-u-soo celinta xiriirka qoyska, qalliinka dadka ku dhaawacma dagaallada, hagaajinta isku-furanka haweenka, ugegsiga masiibooyinka, hab-nololeedka iyo horumarinta fayo-dhawrka. Sanad kasta, Ururka Bisha Cas wuxuu adeegyo kala duwan oo ku saleysan baahiyaha degaanka gaarsiyaa in ka badan 3 milyan oo qof.

Munaasabaddan,Ururka Bisha Cas  oo la shaqeynaya bulshooyinka, maamulada degaanka iyo daneeyayaasha kale ayaa wuxuu ku-celcelinaya sida ay uga go’an tahay inuu taageero dadka nugul.Dhammaan hawlaha Ururka Bisha Cas ayaa waxaa haga mabaadi’da toddobada ah. Mabaadi’dan waxay aasaas u yihiin hawlaheena bani’aadamnimada ah.

Waxaan fursadaan uga faai’deysanaya in aan u mahadceliyo Guddiga Fulinta Ururka Bisha Cas, xubnaha, shaqaalaha iyo mutadawiciinta sida ay ugu dedaalaan, naftoodana ugu huraaan caawinta dadka nugul oo ku sugan dalka.

Waxaan shaqaalaha Ururka Bisha Cas iyo mutadawiciinta iyo qoysaskoodaba u rajeynaya in munaasabadan teeda kale ku gaaraan farxad iyo nabad.

Yusuf Xasan Maxamed
Guddoomiyaha Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed